	# Weydiimaha Intabadan la Weydiiyay - NLRB
	Waa maxay xuquuqahayga hoos yimaada Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka?
	NLRA waa sharci fadaraal kaasoo siiya shaqaalaha xaqa ay u leeyihiin inay sameeyaan mise ku biiraan ururro; ka qaybqaataan howlaha la ilaaliyay, hhowlaha wadajirka mise loo hagaajiyo xaaladaha shaqada; mise iska fogeeyaan inay ku lug yeeshaan howlahan. Wixii macluumaad intaa kabadan, eeg boggeenna Xuquuqaha Shaqaalaha.
	Waa maxay doorka Guddiga Xiriidhka Shaqaalaha Qaranka?
	NLRB waa wakaalad fadaraal madax bannaan oo loo sameeyay si loo dhaqangaliyo Sharciga Xiriirka Shaqada Qaranka. Xarunteedu tahay Washington DC, waxay leedahay xafiisyo goboleed dalka oo dhan halkaas oo shaqaalaha, shaqbo bixiyeyaasha iyo ururadu ay ku qaadi karaan eedaymo dhaqan sharci darro ah, mise ay xareeyaan codsiyo doorasho oo kusaabsan matalaada ururka. Wixii macluumaad intaa kabadan, eeg boggeenna Waxa Aan Samayno.
	Waxaan goobta shaqada iga haysata arrin, balse ma hubo in NLRB ay tahay meesha saxda ah. Waa kuwee hay'adaha kale ee duwaliga ah ee suurtagalka ah inay i caawiyaan?
	Haddii weydiintaadu ku saabsantahay mushahar la'aan, badbaadada shaqada, takoorida shaqada, magdhowga shaqaalaha, mise tiro arrimo kale oo la xiriirta shaqada, waa inaad la xiriirtaa hay'ado kale oo dawladeed. Isku xirka shabakadda iyo lambarrada telefoonka ayaa laga heli karaa boggan Hay'adaha la xiriira.
	Shaqa bixiyahaygu ma hoos imanayaa Xeerka Xiriirka Shaqaalaha Qaranka (NLRA)?
	NLRA waxaa lagu dabbakhaa inta badan shaqo bixiyaha ganacsiga gaarka loo leeyahay, oo ay ku jiraan soosaarayaasha, tafaariiqleyda, jaamacadaha gaarka ah, iyo xarumaha daryeelka caafimaadka. NLRA *ma* khusayso fadaraalka, gobolka, mise dawladaha hoose; shaqo bixiyeyaasha shaqaaleeya kaliya shaqaalaha

	beeraha; iyo shaqo bixiyeyaasha hoos yimaada Xeerka Shaqada Tareenka (wadada tareenada iyo diyaaradaha ee gobolada ee jiray). Eeg tan bogga Heerarka Garsoorka wixii macluumaad dheeraad ah.
	Shaqaalehee lagu ilaaliyay NLRA?
	Inta badan shaqaalaha qaybta gaarka ah waxay hoos yimaadaan NLRA. Sharcigu *ma* ceymiyo shaqaalaha dawladda, xoogsatada beeraleyda, kunturaadlayaasha madaxa banaan, iyo kormeerayaasha (leh xaddiga reebban).
	Ma inaan kamid noqdaa urur si ay NLRA ii difaacdo?
	Shaqaalaha ururka *iyo* goobaha shaqada ee aan ahayn ururka ahayn waxay xaq u leeyihiin inay is caawiyaan iyagoo wadaagaya macluumaadka, saxeexa codsiyada, iyo raadinta hagaajinta mushaharka iyo xaaladaha shaqada wadiiqooyin kala duwan. Wixii macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan dhinacan sharciga, oo ay ku jirto sharraxaadda kiisaskii dhawaa, eeg boggeenna Hawsha Wadajirka ee la Ilaaliyay.
	Waa maxay waajibaadka shaqo bixiyaha iyo ururka shaqaalaha ee hoos yimaada NLRA?
	Shaqo bixiyeyaasha iyo ururada ma xakamayn karaan mise ku khasbi karaan shaqaalaha fulinaya xuquuqdooda hoos yimaada NLRA. Goobta shaqada ee ururka, iyo ururka shaqaalaha waxa ku waajib ah in ay si niyad sami ah uga wada gorgortamaan shuruudaha iyo shuruucda shaqada, heshiis mise khilaaf. Wixii macluumaad intaa kabadan waxaa laga heli karaa Boggeenna Shaqo bixiyaha/Ururka Waajibaadka.
	Waxaan aaminsanahay in xuquuqahayga lagu xadgudbay. Sidee dacwad ula xareeyaa NLRB?
	Eedeymaha waa in lagu xareeyaa Xafiiska Gobolka, badanaa iyadoo la kaashanayo Sarkaala Warfaafinta, lix bilood gudahood ee dhacdada. Xafiiska Gobolka wuxuu baari doonaa eedda, haddii loo arko mid mudnaan leh, wuxuu soo saari doonaa cabasho. Wixii foomam iyo macluumaad intaa kabadan, ka eeg Baaritaanka eedeymaha bogga.
	Sidee ku bilaabaa hannaanka doorashada si loo keeno urur (mise aan u caddeeyo urur jira)?
	Si aad u bilowda hannaan doorasho, waa in codsi laga xareeyaa Xafiiska Gobolka ee NLRB ee kuugu

	dhow oo muujinaya danta ururka (mise danta la xiriirta been abuurka ururka) ugu yaraan 30% shaqaalaha. Ha'yadaha NLRB ayaa markaa baari doona si ay u hubiyaan in Guddigu awood u leeyahay oo aanay jirin kunturaadyo shaqo oo jira oo diidaya doorashada. Wixii macluumaad intaa ka badan waxaa laga heli karaa Boggeenna Doorashooyinka Dhaqanka.
	Waa maxay xeerarka xukuma gorgortanka wadajirka ee kunturaadda?
	Haddii urur loo doorto wakiilka shaqaalaha, shaqo bixiyaha iyo ururka shaqaalaha waxaa looga baahanyahay inay kulmaan waqtiyo macquul ah si ay si daacad ah uga gorgortamaan mushaahrka, saacadaha, iyo mowduucyada kale ee khasabka ah. Xataa markii uu heshiisku dhamaado, dhinacyadu waa inay si niyad sami ah ugu gorgortamaan cidda badali doonta, mise in heshiiska la joojiyo, iyadoo shuruudaha heshiisku dhacayo sii socdo. Wixii macluumaad intaa kabadan oo ku saabsan gorgortanka qalbi saafiga ayaa laga heli karaa Boggeenna Shaqa bixiyaha/Ururka Waajibaadka.
	Ma inaan bixiyaa khidmadaha ururka haddii uu jiro urur jooga goobta shaqada?
	Weydiimaha kusaabsan khidmadaha ururka waxay hoos yimaanayaan sharciyada fadaraalka iyo gobolka iyo xukunnada maxkamadaha. NLRA waxay u ogolaataa ururada iyo shaqo bixiyeyaasha inay galaan heshiisyo uga baahan dhammaan shaqaalaha qaybta gorgortanka inay bixiyaan lacagaha ururka. Haseyeeshee, 27 dowladood ayaa laga mamnuucay heshiisyada noocan oo kale iyagoo meelmariyay waxa loogu yeero “xaq u yeelashada shaqada”. Wixii macluumaad intaa kabadan waxaa laga heli karaa Boggeenna Shaqo bixiyaha/Ururka Waajibaadka.
	Ma sharci baa in shaqo joojin lagu sameeyo mise la doorto loo shaqeeyaha?
	Weerarada iyo soo qaadista waxaa ilaaliya NLRA xaalado gaar ah iyo heerar kala duwan. Wixii macluumaad muiim ah ee khuseeya dhacdo weerar, eeg Bogga Xaqa weerarka. Urur shaqo joojin ma sameyn karo mana dooran karo shaqo bixiyaha si uu ugu khasbo inuu joojiyo ganacsiga uu la leeyahay shaqo bixiyaha kale kaasoo ah bartilmaameedka koowaad ee khilaafka shaqada. Goobaha shaqada ee leh wax kabadan hal shaqo

	bixiye, sida goobta dhismaha, isu imaadka ayaa la ogolyahay oo kaliya haddii bannaan baxu si cad ugu wajahanyahay shaqo bixiyaha koowaad.
	Sidee u sameeyaa codsiga Xeerka Xuriyadda Macluumaadka (FOIA)?
	Si aad u codsato diiwaannada dadweynaha ee hoos yimaada Xeerka Xuriyadda Macluumaadka, eeg boggeenna FOIA oo ay ku jiraan muunad sanbal FOIA ah iyo foomka codsiga elektarooniga ah.
	Kawaran haddii aan qabo weydiin aan liiskan ku jirin?
	Haddii aad qabto weydiin aan liiskan ku jirin, waxaad ku soo diri kartaa weydiin ah iimayl ahaan, mise la xiriir xafiiska NLRB ee deegaankaaga(guji halkan si aad u hesho qariidada xafiisyada) si uu ula hadlo sarkaalka warfaafinta.